

Howlaha la xiriira

Related Services—Somali version

Sharciga waxbarashada gaarka ee dadka naafada ah (IDEA) waxuu sharaxayaa in howlaha la xiriira

Howlaha laxiriira micnaheedu waa xagga gaadiidka iyo wax walboo xagga horumarka ah, saxidda ama waxyaabaha kale ee looga caawiyo ilmaha baahida ay u leeyihiin waxbarashada gaar ahaaneed. Ilmaha qaarkood, waxey u baahan yihiin hawlo la xiriira si ay u gaaraan goolki lagu xusay qorshahooda gaar ahaaneed ee waxbarashada (IEP).

Howlaha la xiriira waxaa ka mid noqon kara:

- Iyadoo horey loo ogaada ama looga qiimeeya naafada ey ilmahu leeyihiin
- Howlaha daaweeyaha hadalka iyo luqadda
- Howsha turjubaanka
- Howlaha uu qabto taqtarka cilmi nafsiga (Psychological service)
- Howlaha uu qabto dhaqtarka jimicsiga. Occupational therapy (waa dhaqtar daaweeya murqaha si uu ilmahu u awoodo in uu qabsadaa qalinka, qaadada iyo waxii la mid ah)
- Madaddaalada, madaddaalada daaweeynta ah (therapeutic recreation)
- Howlaha Bulshada (social work services)
- Howlaha cafimaadka dugsiga
- Howlaha kaalkaaliyaha caafimaadka dugsiga
- Howlaha la talinta, (counseling services) taasoo ey ka mid tahat latalinta xagga baxnaanista (rehabilitation counseling)
- Howlaha ololaynta iyo dhaqaaqa (Orientation and mobility services)
- Howlaha caafimaadka (taasoo ku kooban ogaanshaha iyo qiimeeynta naafada ilmahu leeyahay)

Howlaha la xiriira kuma koobna kuwa aan kor ku xusnay keliya. Haduu ilmahu u baahan yahay howl la xiriirta waxbarashada gaar ahaaneed, waa in uu helaa, xataa hadey ka mid eheyn kuwa kor ku xusan.

Yaa bixiya howlaha la xiriira?

Dadka khibradda u leh xirfadaa ee howlaha ku taqasusay ayaa bixin kara. Kalkaaliyaha ku tababaran ee uu sharciga gobolka u ogolyahay in ay caawiyaan iyagoo lala socda, waa bixin karaan howlaha la xiriira.

Yaa go'aan ka gaara howlaha la xiriira ee ku haboon ilmaha?

Kooxda waxbarashada gaar ahaaneed ee ilmahu leeyahay ayaa go'aansata howlaha la xiriira ee lagama maarmaanka ah. Waalidku waa muhiim in uu ka tirsanadaa kooxda. Kooxdu waxay isu soo uruurineysaa macluumaadka ka soo baxay qiimeeynta ilmaha, dabadeed macluumaadkaa ayey u isticmaalayaan in ay ku ogadaan baahida ilmahu leeyahay. Kooxdu waxey ka wada hadlayaan baahida uu ilmahu leeyahay dabadeedna go'aan ka gaareysaa in loo baahan yahay howlaha la xiriira si ilmaha u gaaro goolkii loo qabtay. Dadka khibradda u leh howlaha la xiriira ee bixiya howshaa, waa muhiim in ay ka mid noqdaan kooxda.

Yaa bixiya lacagaha ku kaca howlaha la xiriira?

Howlaha la xiriira waa in reerka ilmaha ku helaa lacag la'aan. Dugsiga waa in uu waalika weydiiyaa ogolaansho ah in uu ceymiskooda ku dallici karo lacagta ku baxda howlaha la xiriira. Hase ahaatee, ogolaanshaha waa in uu ahadaa mid qoraal ah. Ilmahu waa in uu helaa howlaha la xiriira ee ku qoran qorshaha waxbarashadooda gaar ahaaneed xataa hadii uusan waalidku bixin ogolaanshaha.

Haduu waalidku ogolaado in dugsiga lacagta ku dalaco ceymiskooda, waa in dugsigu ka fileyn in waalidka ka bixiyaa lacag jeebkooda sida qeybta ceymiska (co-payment).

Dugsiga waa ku dallici karaa ceymisyada dadweynaha sida Medicaid lacagta ku baxda howlaha ilmaha loo qabto inta dugsiga uu joogo. Gobolka dugsiga waa in uu ka helaa waalidka ogolaansho u fasaxeysa in warbixinnada ku



Technical Assistance ALLIANCE
 for Parent Centers
 8161 Normandale Blvd.
 Minneapolis, MN 55437-1044
 952.838.9000
 952.838.0190 TTY
 952.838.0199 fax
 888.248.0822 National Toll-free
 alliance@taalliance.org

www.taalliance.org

.....

saabsan xagga waxbarashada, dugsigu la wadaagi karo cid kale. Warbixinnadaa waxaa ka mid noqon kara howlaha loogu qabto ilmaha dugsiga.

Dugsiga kama dooni karo waalidka in uu la yimaado caawimaadda dadweynaha ama ceymis si ilmahooda loogu helo howlaha la xiriira. Dugsiga ma isticmaali karo caawimaadda dadweynaha ilmaha la siiyo hadii ay ku kalifeysa waalidka qodobada soo socda:

- hadii ay naaquusineysa nafsada ceymiska ilmaha leeyahay.
- hadii ay ku kalifeysa in waalidku lacag siyaado ah bixiyo uusan horey u bixin laheyn.
- hadii ay ku siyaadineysa lacagta waalidka ka bixiyo ceymiska ilmaha; ama
- ay sababi u noqon karta in ilmaha ceymiska laga joojiya ama uu ka lumi kara waxqabadkii ceymiska horey ilmaha guriga iyo jaaliyada ugu qabanayey.

Haddaad warbixinno siyaado ah oo ku saabsan hey'adaha ku dalla'ca ceymiska dugsiga xagga howlaha la xiriira, Waxaad eegtaa ALLIANCE ACTion Sheet: "Third party payments" available through ALLIANCE National Center.

Maxaa dhacaya haddii howlaha la xiriira ee ilmaha waxbarashadooda gaarka ah ku xusan la fulin waayo shaqaalo la'aan daraadeed.

.....

Degmada dugsiga waa ku xukuman tahay in howlaha la xiriira ee ku xusan ilmaha waxbarashadooda gaar ahaaneed fulisaa. Haddii degmadu u heyn shaqaalo ku filan howshaa, waa in ay qandraas la gashaa dadka howlaha bixiya ee ka shaqeeya degmadaha kale.